FEDERAALKA SOOMAALIYA
XUKUUMADDA FEDERAALKA
WASAARADDA GAADIIDKA IYO
DUULISTA HAWADA

جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
وزارة النقل والطيران المدني

SOMALI FEDERAL REPUBLIC
The Ministry of Transport and Civil Aviation
Office of The Minister

**REF: MTCA/OM/ 358 /2019** **May 10, 2019**

**WAR-SAXAAFADEED**

Dowlada Federaalka Soomaaliya (DFS) waxay aad uga xuntahay go'aanka ay gaartay dowladda Kenya ee ah in duullimaadyadii tooska ahaa ee Muqdisho iyo Nayroobi maanta loo leexiyay magaalada Wajeer, talaabadaas oo ay dowladdu u aragto mid culeys lagu saarayo dhaqdhaqaaqa muwaadiniinta Soomaaliyeed.

DFS waxay u aragtaa arrintani mid siyaasadeysan oo aan u wanaagsanayn xiriirka derisnimo, is-afgaradyadii hore ee labada dowladood ka dhaxeeyay, ganacsiga iyo isu socodka labada shacab.

DFS waxay u taagan tahay dhawrista sharafta iyo karaamada ummadeeda iyo qaranannimadeeda, waxayna ugu baaqaysaa dowladda Kenya in ay dib u fiiriso tallaabadan culeyska ku ah ganacsiga iyo isu socodka labada shacab ee walaalaha ah.

DFS waxay xiriir la sameyn doontaa hay'adaha ay khuseyso arrintan, iyadoo qiimeyneysa tallaabada ku haboon ee ay qaadeyso.

DHAMMAAD

Email: mohamed.salat@motca.gov.so TEL: +252619175373